Bogga hore: Janaayo 27, 2006

Minnesota ayaa ku bilowday 2006 in dhimashada dabka ay kororto.

Sanadkii 2005, Minnesota waxay dhigtay heer cusub ee uu ugu yaraa sanadlaha dhimashada dabka. Wadarta tirada dadka dhintay waxay ahayd 37, taasoo murugo leh, hasayeeshe loo qaadan karo in ay ka roontahay 86ka dhimashada dabka ee tobaneeyihii ina dhaafay.

Dabku wuxu saamaynayaa qof kasta. Cidna kama reebana. Dad aan waxba galabsan ayaa dhaawacmaya ama dhimanaya, hanti ayaa burburaysa, waxana argagax ku dhacayaa qoysas. Tallaabo deg-deg ah waa inuu qaada qof kasta oo reer Minnesota ah si ay xil gaara isaga saaraan ammaankooda iyo ammaanka dadka ku hareeraysan.

Fadlan ku soo biir dagaalka lagu qaadayo dabka jaaliyaddaada. Raac nasteexooyinka ka hortagga ee qoraalkan kuna dhaqaaq talaabooyinka loo baahanyahay in aad badbaadisid kuwa aad jeceshahay iyo naftaadaba.

www.ci.minneapolis.mn.us/fire

Xiriir la leh

www.fire.state.mn.us

KAHORTAGISTA

DABKA

Xil gaar layska saaro



XIL GAAR AH ISKA SAAR

Bilow adigo xil iska saaraya in aad garowsantahay waxa kugu harereysan dhigayana tusaalaha wacan. Kani adiga ayuu ku anfici doonaa iyo isbaddalka dadka kale ee dhaqammada aan ammaanka ahayn oo xita laga yaabo in aadan ogayn in aad leedahay. Eeg warbixinta liistadan MAANTAY La joog qoyskaada oo dhan.

Jikada dhexdeeda

- Nadiifi makiinadda cuntada lagu karsado iyo miisaska, ka qaad duffanka iyo waxa dhex-yaacsan.
- Dhig weelasha biyuhu ku jiraan iyo waxyaabaha kale ee guban kara meel u jirta makiinadda cuntada karisa 3 cagood.
- Ku hay dab-damiska meel u dhaw iridda
- Waa in aad lahaataa qufullo caruurta ka mamnuuca armaajo kasta.
- Waa in laga saara korontada alaabada guriga marka aan la isticmaalayn iyo inaad caruurta ka fogaysid xargaha meel korana ku haysid.

Qolka dayactirka dhexdiisa

- Baddal filterka alaabtaada si joogta haysana qaab kululeeyaha nadiifiya oo ay kormeeraan qubarada warshada sanad kasta.
- Nadiifi agagaarka iyo gudaha qalabka dhaqidda, inta badan, shaashadda qallajiyaha maran duftiisa markasta oo wax lagu shubo.
- Ku kaydi nadiifiyaha guriga khanad ka fog ilaha kulaylka, caruurta. iyo xayayawaanka dad-la-noolka.

Agaagaarka guriga

Waalidiinta waxay masuuliyadda koobaad ka saarantahay in ay hubiyaan bey'ad ammaan ah baraanna dhaqan ammaan ah. Laakiin, qof kasta ee guriga jooga wuxuu u baahanyahay in uu masuuliyad gaara qaado.

- Dalool kasta waa in aanu lahayn hal xarig wax ka badan hal xarig haddii aanay ku qalabaysnayn UL oo awooddii laga saaray. Dhig caruurta meel ka caaggan qalabka korontada aan la isticmaalin.
- Baddal xargaha dillaacay, rifmay ama waxyeelloobay oo dhan. Marna ha ka hoos marin xargaha korontada bustaha/sajaayadda ama katiifadda.
- Xannibaadyo musqulaha, iyo dul-duleellada jikada.
- Ku hay massafada kululeeyaha ugu yaraan meel ka fog 3 cagood waxyaabaha guban kara.
- Wax qallalan kaliya ku shido, dab-shidkaada qoryaha xilliga markastana xir shaashadda wax celisa.
- Meel sare ku kaydi kabridyada iyo sigaar-shidaha oo caruutu aaanay gaari karin.
- Diyaari sigaar-damiye ballaaran oo hoos u qodon haddii aad oggalaatid in gurigeena sigaar lagu cabo.
- Koombooyinka qashinka waa inay dabool leeyihiin iyo qalabka sigaarka oo dhan lagu cabay waa in la qaboojiyo inta aan la digin.
- Shumaca salkiisu waa inuu baalaarnaada si aanu u liicin waxna u gubin.
- Shumucu waa inuu yaalla masaafo ammaana oo u jirta 3 cagood waxyaabaha guban kara iyo in aan marna laga tegin.
- Ku kaydi dhammaan dareeraha olali kara guriga dibbaddiisa meel qabow oo caruurtu aanay gaari karin.
- Ku kaydi wax kasta "oo aan la isticmaalayn" baqaar yar ama meel wax lagu kaydiyo, ha ku rasayn hareeraha guriga.

Diyaarinta gurigaada

- Ku rakib digniin-bixiyaha qaaca dabaq kasta ee gurigaada, iyo gudaha agagaarka meesha aad seexanaysid si waafaqsan tilmmamaha warshadaha.
- Baddal digniin-bixiye kasta oo looga shaki qabo inuu jiro 10 sano ama ka badan.
- Tijaabi digniin-bixiyaha qaaca bishiiba hal mar iyo in aad baddasho batteriga sanadkiiba laba jeer.
- Ku rakib oo daayactir diginiin-bixiyaha carbon monoxide si waafaqsan agasinka warshadda.
- Dhig dab-damiyaha dabaq kasta oo gurigaada, geerashka iyado la saarayo iridda agteeda.
- Qorshee oo tijaabi qorshaha ka baxsiga iyado ay ku jiraan qaab laba wadiiqo qol walba iyo meelaha lagu kulmo oo guriga ka baxsan. ***Ka bax -dibaddana joog!***
- Bar xubnaha qoyska in aanay tuurin ama isku duubin dharka haddii uu dab qabsado, iyo inay gurguurtaan qaaca hoostiisa.